

Tix: HTS/MTQ/004/2023

24, Juun 2023

Ku: Dhamaan shirkadaha iyo hay'adaha bixiya abaalmarinada dalka (award providers)

Ujeeddo: Diwaan gelinta shirkadaha iyo hay'adaha ka shaqeeya abaalmarinada iyo mideynta noocyada kala duwan ee dalka (Country awards)

Machadka Tayada Qaranka (National Quality institute) ee Hay'adda Tayo-Dhawrka Soomaaliyeed (HTS), isaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo ee ilaalinta iyo badqabka bulshada gaar ahaan mideynta iyo isku duba ridka noocyada kala duwan ee abaalmarinada Dalka (National quality awards), dhawrayana sumcada bulshada soomaaliyeed iyo Tayeynta abaalmarinada dalka, wuxuu soo saaray nidaamka diiwaan gelinta iyo mideynta noocyada kala duwan ee abaalmarinada dalka lagu qabto.

Haddaba, waxaa lagama maarmaan ah in la hubiyo habraacyada loo maro guud ahaan abaalmarinada laqu qabto dalka iyo in shirkaddaha iyo hay'adaha bixiya abaalmarinada heerarkeeda kala duwan laga hubiyo saxnaanta xogaha laguna kormeero ilaalinta Tayada abaalmarinada ay bixiyaan (Quality and standards), ayada oo la waafajinayo halbeegyada iyo nadaamyada abaalmarinada u degan Dalka iyo kuwa caalamka.

Sidaas darteed dhamaan shirkaddaha iyo hay'adaha bixiya abaalmarinada Dalka waxaa la farayaan in ay buuxiyaan foomka diiwaan gelinta shirkadaha/ hay'adaha, ee kor ku xusan laga bilaabo 24 Juun 2023 kuna eg 10 Luulyo, 2023, ama ay boeqdaan Xafiiska Machadka ee Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed.

FG: Dhammaan shirkaddaha iyo hay'adaha bixiya abaalmarinada Dalka (awards) ee aan buuxin shuruudaha looga baahan yahay bixinta abaalmarinada si waafaqsan habraacyada u degan dalka.

Waxaa lagu soo daabici doonaa faafinta rasmiga ah ayada oo bulshada, shirkaddaha, hay'addaha dowliga iyo kuwa aan dowliga aheyn looga digayo in aysan ku kadsoomin la macaamilka shirkadahaas iyo hay'adahaas aan buuxin habraacyada.

Wada shaqeyn wacan

Agaasimaha Machadka Tayada Qaranka

Abdikadir Abdisalam